



Raadinaysaa Xannaano Ilmo da'da ilmaha 0-12?

Xarunta Qoysaska Child Care Aware of Washington waxay kaa caawin kartaa helidda liis shaqsi ah ee barnaamijta xannaanada ilmaha ee aaggaaga kaasoo ku habboon baahiyaha xannaanada ilmahaaga!

Markaa dooranaysid barnaamij xannaano ilmo, ka fiiri sifaadkaan tayo:

- Caafimaad iyo badbaado: Barnaamijku waa nidaamsanyahay, ammaan, nadiif, oo wuxuu ku jiraa xaalad fiican xagga leysinnada waana ku dhaqmayaa xeeladaha ka-hortagga infekshanka COVID-19, sida kala-fogaanshaha jir-ahaaneed, nadiifin dheeri ah iyo xirashada maaskarada wajiga
- Bey'ad waxbarasho: Bey'ad kobcin waxay taageertaa ilmohoo dhan
- Caddad kooxo yaryar iyo shaqaale u dhigma tiro ahaan: Caawi ilmo kasta inuu koro oo waxbarto
- Xiriirrada qoys: Barnaamijku wuxuu fahmayaa waalidiintu inay yihiin macalinka koobaad ee ilmaha wuuna soo dhaweeyaa kala-duwanaanta
- Xirfad Yaqaanimada Shaqaalaha: Shaqaaluhu wuxuu leeyahay aqoonta iyo khibrada uu ku daboolo baahiyaha ilmo kasta

